Kooxda Xiriirka Caalamiga ee Soomaaliya
Madrid, 28 September 2010

**Warmurtiyeed**

Kulankii 18aad ee Kooxda Xiriirka Caalamiga ee Soomaaliya (ICG) ayaa lagu qabtay magaalada Madrid maalmihii 27ka iyo 28ka bisha September ee sannadka 2010 isagoo shirguddoominayay Md. Augustine P. Mahiga, Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay (SRSG) ee Soomaalia. Madaxweyne Shariif Sheekh Axmed ayaa hoggaaminayay wafdiga Soomaaliya. Kulanka waxaa martigelisay Dowladda Spain. Waxaa xafladdii xiritaanka kulanka shirguddoomiyay Md. Miguel Angel Moratinos, Wasiirka Arrimaha Dibadda iyo Xiriirka.

Kooxda Xiriirka Caalamiga waxay mar labaad ku celisay inay ka go'antahay taageerada ay u hayso midnimada, gobanimada iyo midnimada dhuulka Soomaaliya waxayna cambaareysay weerarradii argagaxisada ahaa ee lagu qaaday magaalada Kampala bishii July 2010, weerarkii lala beegsaday Hoteel Muna bishii Agoosto 2010, aiyo weerarkii lagu qaaday ciidamada AMISOM ee joogay gegida diyaaradaha bishii September. Kooxdu waxay Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay iyo dowladaha xubnaha ka ah ugu baaqday inay meel uga soo wada jeestaan sidii loo joojin lahaa Al-Shabaab iyo taageerayaashooda.

Kooxdu waxay muujisay inay ku wada qanacsanyihiin in kala qaybsanaantii u dhexeysay madaxda Hay'adaha Dowladda Federaalka Ku Meelgaarka ah ay si isafgarad ah ku dhammaatay. Kooxdu waxay hoggaanka Soomaaliyeed ugu baaqday inay midaysanaadaan dadaalkoodana mideeyaan si ay wax uga qabtaan hawlaha muhimka ah ee sugeysa. Kooxdu waxay isku afgaratay in loo baahanyahay in dadaal adag la sameeyo si loo sii wado wadatashiga loogu jiro qabyoqoraalka dastuurka si loo dhamaystiro. Kooxdu waxay Hay'adaha Dowladda ku sii dhiirigelisay inay diiradda saaraan maamul wanaagga, la dagaallanka musuqmaasuqa iyo horumarinta isla xisaabtanka iyo hufanaanta iyo inay adeegyada asaasiga ah dadweynaha gaarsiiso.

Madaxweyne Sharaif ayaa mar labaad xaqiijiyay in isagu ay ka go'antahay inuu ka shaqeeyo nabadda iyo xasilloonida. Wuxuu mar kale xaqiijiyay inuu ku talajiro inuu magacaabo Ra'iisal Wasaare mustaqbalka dhow iyo inuu dhammaystiro hawlaha kala guurka ee waaweyn. Wuxuu bulshada caalamka ka codsaday taageero dheeraad ah si wax looga qabto nabadgelyada iyo dhismaha ha'adaha dowladda si loo gaaro natiijo la taaban karo. Wuxuu intaa ku daray in hawsha wadatashiga dastuurka ay muhim u tahay dadka Soomaaliyeed si ay uga qaybqaataan hanaanka siyaasadeed ee mustaqbalka.

**Kooxda Xiriirka Caalamiga ee Soomaaliya waxay soo jeedisay talooyinka soo socda:**

1. **Dowladda TFG waa inay si degdeg ah muddo lixdan maalmood ah gudaheed ku diyaariso qorshe lagu sharxayo sida loo maamulayo inta ka hartay xilliga kala guurka ah.** Qorshuhan waa inuu wataa istaraatiijiyad buuxda oo mudnaanta la siiyay oo leh ujeeddooyin siyaasadeed iyo jadwal waqtiyaysan, oo ay taageerayaan hawlo nabadgelyo, iyo hawlo mudnaan leh ee la xiriira dibudhiska iyo horumarinta oo ay ka midtahay miisaaniyadda muddada hartay. Waa in Xafiiska UNPOS uu isku dubbaridaa taageerada bulshada caalamku ay siiso istaraatiijiyada Dowladda TFG, oo ay ka midtahay in si degdeg ah qorshe hawleed loo diyaariyo. Kooxdu waxay isku afgaratay in xafiiska UNPOS uu dib u soo nooleeyo hanaanka isuduwid ee hadda jira sida Guddiga Heerka Sare (HLC) si uu u hoggaamiyo isuduwidda iyo kormeerka geedi socodka. Qorshahan waxaa laga maalgelin doonaa baraamijada hadda jira, ama lacag gaar ah oo loo qoondeeyo hirgelinta halwo mudnaan leh oo xaddidan.

2. **Maadaama ay marxaladda ku meelgaarku dhammaanayso 20ka bisha Agoosto 2010, Kooxdu waxay ku nuuxnuuxsatay in loo baahanyahay in Ha'adaha Federaalka Ku Meelgaarku ay xoojiyaan dadaalkooda si ay dhammaystiraan hawlada kala guurka ah ee muhimsan**, gaar ahaan dhammaystirka hawsha qoraalka dastuurka. Kooxdu waxaa kaloo ay isku afgaratay in loo baahanyahay in Hay'adaha Federaalka Ku Meelgaarka ah ay ka fiirsadaan siyaabo kala duwan ee wax loo qaban karo marxalla ka dambeysa xilliga ku meelgaarka ah, iyagoo la tashanaya dadweynaha Soomaaliyeed taageerana ka haysta bulshada caalamka.

3. **Inkastoo Heshiiskii Jabuuti uu yahay saldhigga keliya lagu gaarayo nabad iyo dibuheshiisiin qaran oo ka dhacda Soomaaliya, Dowladda TFG waa inay kordhisaa dadaalka wadahadallo iyo dibuheshiisiin ay kula**

**jirto koooxaha, maamullada iyo shakhsiyaadka ka baxsan geedi socodka nabadda Jabuuti,** kuwaasoo muujiyay inay doonayaan inay ku soo biiraan geeddiga nabadda calaaddana joojiyaan. Iyadoo la ogyahay in Xildhibaannada Barlamaanka Soomaaliyeed ay metelaan gobollada, bulshada iyo kooxaha bulshada, Dowladda TFG waa inay ballaariso saldhiga dibuheshiisiinta qaran oo ay la xiriirto dadka Soomaaliyeed, oo ay ka midyihiin qabiillada, culimaaudiinka, ururrada haweenka, bulshada ganacsatada, Jaaliyadaha qurbajoogta ah iyo maamullada degmooyinka iyo bobollada. Waxaa intaa dheer, Dowladda TFG iyo Ahlu Sunna wal Jamaaca (ASWJ) waa inay qaadaan tallaabooyin la taaban karo si loo gaaro hirgelin buuxda oo waxtar leh loogu sameeyo heshiiska. Waa in sidoo kale la hirgeliyaa heshiisyada kale, sida Heshiiskii Gaalkacyo ee dhexmaray Dowladda TFG iyo Puntland, iyo Hanaankii Kampala Framework ee Burcad Badeedda lala galay Somaliland iyo Puntland.

4. **Xoojinta hanaanka iskaashi iyo isuduwid ee hadda jirta waaxaha amniga dhexdooda,** sida Guddiga Amniga Wadajirka ah (JSC) iyo kooxihiisa farsamo. Arrintan waa in lala kaashadaa hay'adaha amniga Soomaaliyeed iyo bulshada caalamka. Kooxda Xiriirku waxay garwaaqsatay go'aanka ay gaareen Ururka Midowga Afrika iyo Urur Goboleedka IGAD oo ah in la kordhiyo tirada ciidamada nabadilaalinta AMISOM ee Soomaaliya oo hadda ah 8,000 lana gaarsiiyo 20,000. Kooxdu waxay sidoo kale garatay go'aankii lagu qaatay shirmadaxeedkii Midowga Afrika ee 10kii bishii July 2010 waxayna ugu baaqday bulshada caalamka inay kordhiso taageerada ay u fidiso AMISOM oo ay ka mid tahay cawil-celinta qalabka ciidan ee leeyihiin ciidamada waddamada iyo kordhinta gunnada la siiyo ciidanka lana gaarsiiyo heerka Qaramada Midoobay. Kooxda Xiriirku waxay sidoo kale isku afgaratay inay hirgeliso arrimahan soo socda ee mudnaanta leh: in Dowladda TFG lagu taageero inay qaadato Qiimaynta Waaxda Amniga iyo dhammaystirto Qorshaha Qaran ee Amniga iyo Xasillinta, iyo inay dhismaha hay'adaha amaanka la xiriiriso hawsha qoraalka dastuurka. Kooxda Xiriirku ICG waxay soo dhoweysay dadaallada kala duwan ee loogu jiro dhismaha ciidan Soomaaliyeed oo xoog iyo karti leh, waxayna dhiirrigelisay Dowladda TFG inay ciidamada koos keento hoggaan ciidan oo waxtar leh iyadoo ay taageerayso bulshada caalamka. Kooxdu waxay ku nuuxnuuxsatay in loo baahanyahay in la isuduwo tababarada ay bixiyaan waddamada kala duwan iyo hay'adaha kala duwan si ay u noqdaan kuwo isla jaanqaadaya. Kooxdu sidoo kale waxay garatay in loo baahanyahay in diiwaangelin lagu sameeyo dhammaan ilaha hawlaha dhaqaale ee sharci darrada ah, oo ay ka midyihiin ganacsiga dhuxusha iyo qaadka, hawshaasna ay kaalmo ka geysato bulshada caalamka.

5. **Kooxdu waxay garwaaqsatay in Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay uu ku talajiro in la eego saameynta ay burcad badeedda iyo wax ka qabashada sababaha dhaliyay dhibaatadan ku yeelan karaan istaraatiijiyada guud ee xal loogu raadinayo Soomaaliya iyo dhanka kaleba inay istaraatiijiyadu saameyn ku yeelan karto burcad badeedda,** oo ay ka midtahay baahida loo qabo in la isuduwo kaalmada lagu bixiyo dibuhabaynta iyo horumarinta waaxaha siyaasadda, mileteriga iyo amniga. Kooxda Xiriirku waxay soo dhowaysay dadaallada hadda laga wado gobolka si dhibaatada wax looga qabto iyo weliba hawlgalka ciidamada badda ee caalamiga ah. Kooxdu waxay sidoo kale mahad u soo jeedisay waddamada hadda qaaday culeyska maxkamadeynta dadka lagu tuhmay inay burcad badeed yihiin, waxayna codsatay in waddamadaas dhan kasta taageero dheeraad ah laga siiyo si ay u kordhiyaan tayadoona, waxayna soo dhoweysay Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay oo ku talajira inuu siyaabo/meelo kale oo dadkaas lagu maxkamadeeyo. Arrinta amaanka badaha Soomaaliya waxaa diiradda loo saaray ma aha keliya burcad badeedda awgeed ee waa ganacsiga sharci darrada ah, tahriibinta hubka iyo dadkaba. Kooxdu waxay garowsatay dadaalka wadajirka ah ee Soomaaliyeed oo burcad badeedda wax looga qabanayo, kaasoo loo marayo Hanaanka Kampala. Kooxdu waxay soo dhoweysay magacaabidda uu Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u magacaabay Md. Jack Lang inuu noqdo La taliyihiisa Gaarka ah ee Arrimaha Sharica la xiriira burcad badeedda ka dhacda xeebaha Soomaaliya.

6. **Si Degdeg ah oo Joogta ah oo loo dhismaha hay'adaha.** Taasi waxaa ka mid ah isuduwidda iyo isugeynta hawlaha la qabto si loo xaqiijiyo in bixinta mushaaraadka xubnaha Baarlamaanka, shaqaalaha dowladda iyo ciidamada amaanka ee lagu bixiyo waqtiga la filanayo lala xiriiriyo horumarka la gaaro iyo yoolasha la isku afgarto. Taageerada la siiyo hawlaha tayadhiska, oo ay ka midyihiin in xeeldheereyaal farsmo la bixiyo waa arrin muhim u ah shaqaynta hay'adaha dowladda. Kooxdu waxay garatay muhimmadda ay leedahay hufanaanta iyo isla xisaabtanka Hay'adaha Dowladda TFG iyo bulshada deeqbixiyeyaashba si loo xaqiijiyo taageero sii socota.

7. **Taageero dheeraad ah oo la siiyo gargaarka baniaadanimo, ilaalinta dadka rayadka ah iyo horumarinta bartilmaameedsanaysa adeegyada asaasiga iyo fursadaha dhaqaalka oo ay ka midtahay taageeo toos ah oo la siiyo Dowladda TFG**. Kooxdu waxay garowsatay in meelaha uu ku shaqaynayo iyo maalgelinta gargaarka

aadanimo ay aad hoos ugu dhaceen, waxayna codsatay in maalgelin dheeraad ah la siiyo si wax looga qabto ka maqnaanshaha khatarta ah ee meesha ka jirta, taasoo naf badan lagu badbaadin karo. Waxaa intaa dheer, waxaa la codsaday in deeq sannado badan qaadanaysa la biyo si wax looga qabto baahidii horumarineed ee horey u jirtay. Kooxdu waxay sidoo kale tilmaantay muhimmadda ay leedahay in si joogta ah warbixin iyo ololeyn laga soo saaro xadgudubyada xuquuqda aadanaha Soomaaliya ka dhacda, waxayna soo dhoweysay kulanka soo socda ee Golaha Xuquuqul Insaanka oo ka doodi doona Soomaaliya.

Kooxda Xiriirka Caalamiga waxay garwaaqsatay kaalintii wanaagsanayd ee uu ka geystay Md. Ahmedou Ould-Abdallah, oo ahaa Ergeygii hore ee Gaarka ahaa ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ee Soomaaliya, waxayna soo dhoweysay Md. Augustine Mahiga oo ah Ergeyga cusub ee Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay. Xubnaha Kooxdu waxay mahad u soo jeediyeen dowladda Spain sida ay u martigelisay kulanka waxayna soo dhoweeyeen heshiiska ay la saxiixatay dowladda Soomaaliya oo la xiriira taageerada miisaaniyadda.

Kulanka xiga ee Kooxda ICG waxaa la qaban doonaa bisha February 2011.

Waxaa kulanka joogay: Algeria, Austria, Belgium, Burundi, Canada, China, Denmark, Djibouti, Egypt, Ethiopia, Finland, France, Germany, Italy, Japan, Kenya, Netherlands, Republic of Korea, Malaysia, Norway, Russian Federation, Somalia, South Africa, Spain, Sudan, Sweden, Switzerland, Tanzania, Turkey, Uganda, UK, USA, Yemen, Midowga Afrika, Midowga Yurub, Urūrgoboleedka IGAD, Jaamacadda Carabta, NATO, Ururka Dowladaha Islaamka, Bangiga Adduunka, iyo Qaramada Midoobay.